NATIONWIDE CHILDREN'S
When your child needs a hospital, everything matters.

Helping Hand™ Health Education for Patients and Families


# Tilmaamaha Guud ee – Badqabka Qaadashada Daawada

# Medicine Safety – General (Somali)

Carruur badan ayaa u baahan inay qaataan daawo si looga daaweeyo xanuunka ay qabaan ama xaalada haysata. Waxay qaadan karaan qaar kamid ah daawooyinkaan muddo gaaban, ama muddo sanado badan ah intaba. Halkaan waxaa ku qoran qaar kamid ah tallooyinka ku aadan badqabka qaadashada daawooyinka.

## Sida loo qaato

- Dhaq oo qalaji gacmahaaga kahor **iyo** kadib marka aad qaadato daawada.
- Isticmaal saliingaha afka ama aalada lagu cabiro ilmaha oo baro sida loo isticmaalo (Sawirka 1 aad). Waxaad farmashiilaha ka codsan kartaa inuu cadadka daawada ku qoro dusha saliingaha ama aalada cabbiirka. HA isticmaalin qaadada cuntada ee caadiga ah ama qaadooyinka cuntada lagu cuno. Sidaan ma ahan qaab fiican oo lagu cabbiro daawada dareeraha ah.




**Sawirka 1 aad** Isticmaal saliingaha afka (bidix) ama aalada lagu cabbiro ilmaha (midig).

- Sii oo kaliya cadad daawada ee uu dakhtarku soo qoray hana siin intaas wax ka badan.
- Cidna hala wadaagin daawada. Daawo qof loo soo qoray ha siin qof kale. Arrintaan waxay khuseysaa carruurta iyo dadka waawayn.
- Ha isticmaalin daawada kadib marka la gaaro taariikhda ay dhacayso ee galka ku qoran.
- Weydii farmashiilahaaga, dhakhtarkaaga, ama dhakhtar kahor inta aadan burburin wax daawo ah.


©2001, la muraajaceeyay 2022, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

- Haddii cunugaagu matago kuurada daawada aadana hubin waxa aad sameyn karto, wac farmashiilahaaga, dhakhtarkaaga, ama dhakhtarka daawada kusoo qoray.
- Wac dakhtarka cunugaaga, dhakhtarka daawada usoo qoray, ama farmashiilaha haddii aad qabto wax su'aalo.
- La hadal dhakhtarka cunugaaga ama farmashiilaha kahor inta aadan ilmaha siin wax ka badan hal daawo isku waqti.
- U sheeeg dhakhtarka cunugaaga ama dhakhtar kale si aad ogala hadasho daawooyinka uu qaato cunugaaga ee uu soo qoray daawo bixiye kale ama dhakhtar.

## KEYDINTA

- Akhri qoraalka ku qoran dusha daawada si aad u ogaato qaabka loo kaydiyo. Qaar kamid ah daawooyinka waa inaan lagu kaydin heerkulka guriga. Qaar kale oo kamid ah daawooyinka waxa loo baahan yahay in lagu hayo qaboojiyaha. Ha dhigin daawooyinka musqusha. Daawadu way kululaanaysaa waxaana gaaraya uumi. Daawada ha u deyn gaariga sababtoo ah waxaa laga yaabaa in gaarigu kululaado ama aad u qaboobo.
- Kareemada iyo saliida ha dhigin meel u dhaw daawada cadayga maadaama ay si fudud iskugu darmi karaan.
- Dhammaan daawooyinka waa in la dhigaa meel ka fog kuleylka tooska ugu dhacaaya iyo ileyska qoraxda. Qaar daawooyinka kamid ah waa in lagu kaydiyo meel mugdi ah guud ahaan.
- Isticmaal furka aysan carruurtu furi karin, daawadana ku xir furka markasta oo la isticmaalo. Taxadar dheeraad ah u lahoow daawooyinka iyo feetamiinada leh ayroonka. Ayroonka ayaa ah waxyaabaha ugu badan ee carruurta ay ka qaadaan sunta.
- Daawooyinka iyo feetamiinada dhig meel aysan arki karin ama gaari karin carruurtu. Daawooyinkaan waxaa kujira daawooyinka laga soo gato dukaamada (OTC).
- U sheeg dadka booqashada kugula jooga inay daawadooda dhigaan meel aysan arki karin ayna gaari karin carruurtu.

## Talooyin kale

- Daawada kasoo gado hal farmashi si ay u fududaato inay hubiyaan daawooyinka kale.
- Qaar kamid ah daawooyinka waxaa laga helaa oo kaliya farmashiyaal gaar ah. Farmashiiyaal badan ayaa kuu dalbi doona daawada haddii ay og yihiin in cunugaagu u baahan yahay. Ka fiiri farmashigaaga kahor inta aadan ka bixin isbitaalka si aad u hubiso inaad heli doonto daawada laguu qoray. Sidoo kale daawada cunugaaga waxaad ka heli kartaa Farmashiga Nationwide Children’s Hospital.

- Ka codso farmashiga cunugaaga inuu daawada kuu diyaariyo 3 illaa 5 maalmood kahor inta aadan soo bixin.
- Qaar kamid ah daawooyinka dib looma qaadan karo. Ka codso dhakhtarka daawada u qora cunugaaga inuu u qoro daawo cusub.
- Mar walba akhri xogta ku qoran xaashida ku dhex jirta daawada.
- Haddii daawada cunugaaga aad ku aragto wax kugu cusub, u sheeg farmashiga.
- U sheeg dakhtarka ama farmashiilaha arrimaha ku saabsan xasaasiyad kasta ood kala kulanto daawo kasta.
- Mar walba hayso liiska daawooyinka uu hadda cunugaagu qaato. Daryeel bixiyaasha kale waa inay sidoo kale u haystaan liiska. Waa inay kujiraan daawooyinka lasoo qoray, daawooyinka OTC, daawooyinka dabiiciga ah, iyo nafaqada dheeraadka ah. Iskuday inaad ku darto waxyeellooyinka suurtagalka ah ee laga dhaxli karo mid walba.
- Haddii dugsiga cunugaagu uu bixinaayo daawada, waxay u baahan yihiin qoraal ay ka helaan adiga iyo dhakhtarka qoray daawada. Sidoo kale waxay u baahnaan doonaan dhalo labaad oo ay daawadu ku qoran tahay si ay daawada u dhex geliyaan.
- Marka daawada laga kaaftoomo, ku qas biyo ama aalkahoolka. Ku qas daawada alaabaha aan la rabin, sida budada kofeega ama cuntada bisada. Markaas kadib, dib u geli wax aad isku qastay weel ama weel kale oo aan daadaneyn. Ku tuur galka qasacada qashinka oo taala meel aysan caruurta iyo xayawaanadu gaari karin.

## Ogeysiis gaar ah oo ku saabsan uurka iyo naasnuujinta

- Hadii cunugaagu uu u maleynaayo inuu uur leeyahay, u sheeg dhakhtarka daawada u qoray ama dhakhtarka kahor inta uusan bilaabin wax daawo ah. Qaar kamid ah daawooyinka waxay dhibaato ku keeni karaan ilmaha aan dhalan.
- Haddii bukaanku uu naasnuujinaayo, waa inay u sheegtaa dhakhtarka daawada u qoraaya ama dhakhtarka kahor inta aysan qaadan wax daawo ah. Qaar kamid ah daawooyinku waxay u gudbi karaan caanaha naaska waxayna ilmaha ku keeni karaan waxyeelo caafimaad daro.
- Qaar kamid ah daawooyinka waxay halis ku keeni karaan qofka uurka leh ee daawada siinaaya ilmahaaga. Haddii adiga ama daryeel bixiyahaaga uu uur leeyahay, waydii dhakhtarka ama dhakhtarka daawada soo qoray in daawadaan ay caadi tahay oo uu taaban karo qof uur leh.

## Kahortagida khaladaadka daawada

Dhimashada ay sababaan khaladaadka daawada waxay dhacaan maalin kasta. Dhimashadaan waxaa sababi kara marka daawado si qalad ah loo qaato, marka la qaato daawo loosoo qoray

qof kale, ama marka la qaato cadad qaldan oo daawo ah. Halkaan waxa ku qoran tallooyin ku saabsan sida la iskaga ilaaliyo khaladaadka:

- Sii daawada kaliya qofka loo soo qoray.
- Baro wax kujirra daawada cunugaaga iyo sababta uu u qaadanaayo. Baro magaca, qoraalka, iyo qiyaasta daawada uu qaato cunugaaga. Bar cunugaaga haddii uu gaaray da'da uu fahmi karo daawada.
- Mar walba daar layrka marka aad siineyso ama uu qaadanaayo daawo cunugaaga.
- Si taxadar leh u akhri qoraalka daawada marka aad siineyso ama ilmuhu qaadanaayo daawada. Labo jeer hubi qiyaasta daawada, waqtiga maalinta, iyo qofka loosoo qoray.
- La joog cunugaaga inta uu ka laqaayo kuurada daawada.
- Dhex geli daawada dhalada ay ku qoran tahay magaca daawada ee lala keenay daawada ama qaab habboon u dhexgeli bokiska kaniiniga ama galka kaniiniyada haray.
- Kusoo qaado daawada cunugaaga dhalada originaalka ah mar kasta oo cunugaaga uu arkaayo dhaqtarka daryeelka siiya, dhakhtarka, ama dhakhtarka ilkaha; iyo markaad aadaysid qolka xaaladaha degdega ah; ama marka la seexinaayo isbitaalka.
- Haddii aad dooneyso inaad si joogto ah u siiso daawada cunugaaga, hal qof ha siiyo daawada cunugaaga waqti kasta. Kalaandarka ku qor taariikhda iyo waqtiyada aad ilmaha daawada siiso, si aadan u siin daawo dheeraad ah.
- Meel ku qoro **Lambarka taleefanka Xarunta Sunta, 1 (800) 222-1222**, gaar ahaan ku qoro meel aad si fudud oga arki kartid (TTY 1-866-688-0088).

## Su'aalaha ay tahay in la waydiiyo dhakhtarka, dhakhtarka ilmaha daryeelka siiya, ama farmashiilaha

- Waa maxay daawadaan (Sawirka 2 aad)?
- Maxaa loo isticmaalaa daawadaan?
- Sidee ayay tahay inuu cunugaygu u qaato daawadaan?
- Sidee u kaydiyaa daawadaan?
- Waa maxay waxyeelooyinka caaafimaad daro ee inta badan laga qaado daawadaan?
- Daawadaan si qalad ah maloo qaadan karaa?
- Maxay tahay inaan sameeyo si aan u helo daawo dheeraad ah mara ay iga dhamaato?




**Sawirka 2 aad** Waydii farmashiilaha su'aal kasta ood qabtid.

- Maxay tahay inaan sameeyo haddii cunugaygu matago ama uu soo tufo daawadiisa?
- Maxay tahay inaan sameeyo haddii cunugaygu uusan qaadan kuuro daawadaan ah?

## Tallaabooyinka la qaado si looga hortago si xun u isticmaalida daawada

Qaanada daawada ee guriga waa meel ay si fudud daawada oga soo qaadan karaan caruurtu. Weydii farmashiilaha canugaada in daawada cunugaagu si xun loo qaadan karo. Yaree khatarahaan adoo adeegsanaaya tallaabooyinkaan:

- **Kormeer**
  - — Tiri oo isha ku haay daawada cunugaaga.
  - — Tiri daawadaada.
- **Badbaado ah**
  - — Geli dhammaan daawooyinka, oo ay kujirto daawada OTC, qaanad xiran ama meel kale oo badqab leh oo uusan cunugaaga kasoo qaadan karin.
- **Fogeynta daawada**
  - — Qaar kamid ah daawooyinka waxay u baahan yihiin in la geeyo meel gaar ah oo loogu talagalay si loogu tuuro. Dhammaan Farmashiyada Bukaan socodka Isbitaalka Nationwide Children waxay leeyihiin meel daawooyinka haray lagu qubo. Sidoo kale waxaad isticmaali kartaa Dib u celinta Daawada ee DEA (DEA's Drug Take Back Day) ama waxaad interneetka ka baari kartaa goobaha lagu qubo daawooyinka www.rxdrugdropbox.org.
  - — Qoraalka ku dul qoran daawada ka saar kahor inta aadan tuurin si aan loo aqoonsan daawadaada ama uusan qof si sharci daro ah dib usoo qaadan daawadaada.
- **La hadal cunugaaga**
  - — Si degan ogala hadal isticmaalida daawada cunugaaga, oo ay kujiraan daawooyinka laguu soo qoray.
  - — La hadal xubnaha qoyskaaga, gaar ahaan dhallinta, arrimaha la xariira halista ka dhalan karta qaadashada iyo isku qaska daawooyinka. Qaadashada daawooyin badan, ama isku qasida qaar kamid ah daawooyinka, waxay sababi karaan dhimasho. Haddii aadan aqoon halista ka dhalan karta, waydii dhakhtarka daryeelka siiya ama farmashiilaha.